

## **Korona - warbixin waalidka ku socoto kuna saabsan maalinta xannaanada carruurta**

Si loo xaddido kala qaadista cudurrada ayaan halwgallo badan ka billownay xannaanada carruurta. Nalalka samaanfalaha ee kala ah heerarka cagaarka, jaallaha iyo guduudku waxay na tusayaan hawlgallada looga hor tagayo in cudur la kala qaado ee heerarkaas kala duwan ka jira xannaanada carruurta. Xaaladda kala qaadista cudurrada ee Norway ayay ku xiran tahay hadba heerka la raacayo. Xannaanada carruurta nidaamka ay raacdo wax bay ka beddeli doontaa haddii ay xaaladda kala qaadista cudurradu is beddesho.

### **Waa ammaan in ay carruurta xannaanada carruurta aadaan**

Weli waan ka taxaddaraynaa baahida ay carruurta u qabaan daryeelka jireed annaga oo hubin doonna in ay carruurta dhammaantood xannaanada carruurta ku dareemaan ammaan, ka mid ahaasho iyo ka helitaan. Muddada soo socotana waxaan si gaar ah uga taxaddari doonnaa in aan si fiican u hubinno ka hor tagga cudurrada. Waxaan si gaar ah ula soconaynaa:

- In aan qofna xannaanada carruurta imaannin haddii uu jirran yahay.
- In gacmaha la dhaqdo oo ilmaha lala socdo si ay gacma-dhaqashada si fiican ugu bartaan.
- In ay wanaagsanaato nadaafadda xannaanada carruurta.

### **Sidee ayay noqon doontaa maalinta xannaanada carruurta?**

#### **Heerka cagaarka ah:**

Maalinta xannaanada carruurta waxay noqon doontaa sidii caadiga ahayd, laakiin annaga shaqaalaha ka ah xannaanada carruurta waxaan iska ilaalinaynaa in aan gacanta iska salaanno ama hab isa siinno annaga waaweyn.

#### **Heerka jaallaha ah:**

Qaybaha oo dhan ayaa isu imaan kara, carruurta oo dhan na deeq buuxda ayaa lagu siinayaa xannaanada carruurta. Aagga bannaanka waa la kala qaybin doonaa si kooxaha loo kala duwo. Qof shaqaale ah oo joogto ayay kooxdiiiba lahaan doontaa. Annaga shaqaalaha ka ah xannaanada carruurta waxaan iska ilaalinaynaa in aan gacanta iska salaanno ama hab isa siinno annaga waaweyn.

#### **Heerka guduudan:**

Carruurta waxaa loo kala qaybin doonaa kooxo yar-yar. Waxaa laga yaabaa in la soo gaabiyo wakhtiga ay xannaanada carruurta furan tahay, ayadoo sidoo kale ay dhici karto in laga maarmi waayo in ay waalidku carruurta keenaan wakhtiyo kala duwan. Masaafo fiican ayaan u jirsanaynaa kooxaha aan wadashaqaynta nala lahayn. Aagga bannaanka waa la kala qaybin doonaa si kooxaha loo kala duwo, carruurta in badan ayay bannaanka joogi doonaan. Annaga shaqaalaha ka ah xannaanada carruurta waxaan iska ilaalinaynaa in aan gacanta iska salaanno ama hab isa siinno annaga waaweyn.

## **Qalabka lagu ciyaaro guriga ha ka soo qaadan**

Looma baahna in ay carruurta guriga ka soo qaataan qalabka lagu ciyaaro. Haddii uu ilmahaagu leeyahay boombale uu ku seexo, kaas wuu soo qaadan karaa. Laakiin waxaa aad muhiim u ah in aan boombalaha lala wadaagin carruurta kale ee xannaanada carruurta.

Haddii aad wax su'aal ah qabto – xannaanada carruurta la soo xiriir 😊